

Adeegyada rugta caafimaadka carruurta ee Finland

Lastenneuvolapalvelut Suomessa (somal)



ADEEGYADA RUGTA CAAFIMAADKA CARRUURTA

- Adeegyada rugta caafimaadka carruurta ee Finland waxay ka mid yihiin adeegyada daryeelka caafimaadka aasaasiga ah.
- Adeegyadani waa kuwo sharcigu waajib ka dhigay, waxaana qabanqaabiya gobollada adeegyada daryeelka.
- Adeegyada waa ikhtiyaari, waana bilaash.
- Waxa ay u furan yihiin dhammaan qoysaska carruurta leh.

UJEEDDADA IYO WAAJIBAADKA ADEEGYADA RUGTA CAAFIMAADKA CARRUURTA

- Kor u qaadidda caafimaadka iyo nolol-wanaagga carruurta aan weli iskuul gaarin iyo qoysaskooda
 - La socodka koritaanka iyo horumarka jireed, maskaxeed iyo bulsho ee ilmaha
 - Taageeridda waalidiinta tarbiyada iyo daryeelka wanaagsan ee ilmaha.
 - Taageeridda awoodda waalidiinta iyo nolol-wanaagga maskaxda
 - Taageeridda xiriirka lammaanaha
-

KORMEERRO CAAFIMAAD EE RUGTA CAAFIMAADKA CARRUURTA

- Rugta caafimaadka carruurta waxay qoyska u soo bandhigtaa booqasho guri marka uu qoyska u dhasho ilmo. Kulanka ugu horreeya ee ilmaha waxaa sidoo kale lagu qaban karaa rugta caafimaadka carruurta.
- Carruurta aan weli iskuul gaarin waxaa si joogto ah loogu sameeyaa baaritaanno caafimaad.
- Kormeerka caafimaadka qoyska waxa uu la kulmaa kalkaalisada caafimaadka ama dhakhtar. Mararka qaar qoyska waxa ay booqan karaan kalkaalisada iyo dhakhtarka labadaba.
- Ballamaha rugta caafimaadka carruurta badanaa qoyska ayaa iskii uga qabsada rugta caafimaadka carruurta ee deegaanka uu deggen yahay, iyada oo telefoon ama nidaam ballan-qaadasho elektaroonig ah la isticmaalo. Haddii loo baahdo turjubaan ayaa ka qayb geli kara ballanta.
- Rugta caafimaadka carruurta waxaa la imaan karaa oo keliya marka la caafimaad qabo. Haddii ilmaha ama waalidku xanuunsan yahay, ballanta rugta caafimaadka carruurta waa in la kansalaa ama dib loo dhigaa.



WAXAY KA KOOBAN YIHIIN KORMEERADA CAAFIMAADKA


- La socodka koritaanka iyo horumarka ilmaha
- La socodka awoodda dhaqdhaqaaqa ee ilmaha
- La socodka horumarka hadalka, xirfadaha bulsheed, iyo horumarka is-dhexgalka
- Qiimeynta caafimaadka afka iyo ilkaha
- Talo-bixin caafimaad
- Tallaallo
- Taageeridda waalidnimada iyo tarbiyada
- Taageeridda caafimaadka maskaxda
- Qiimeynta baahida taageero dheeraad ah, iyo u gudbinta daryeel kale haddii loo baahdo

TUSAALOYIN MAWDUUCYO RUGTA CAAFIMAADKA CARRUURTA LAGAGA HADLO WAXAA KA MID AH:

- Daryeelka aasaasiga ah ee ilmaha
 - Nafaqada iyo cuntada
 - Horumarka hadalka iyo dhaqdhaqaaqa jirka ee ilmaha.
 - Maalin-habaynta ilmaha, dhaqdhaqaaqa jirka iyo nasashada.
 - Waqtiga shaashadda
 - Caafimaadka afka
 - Tarbiyada ilmaha marxaladaha da'aaha kala duwan
-

ISKAASHI LA LEH ADEEGYADA KALE EE QOYSASKA CARRUURTA LEH

- Rugta caafimaadka carruurta waxay la shaqaysaa adeegyo kale oo loogu talagalay qoysaska carruurta leh. Adeegyadan waxaa ka mid noqon kara, tusaale ahaan, barbaarinta hore ee carruurta iyo adeegyada bulshada ee qoysaska carruurta leh.
- Rugta caafimaadka carruurta waxaa lagu qiimeeyaa baahida taageero dheeraad ah ee ilmaha iyo qoyska. Haddii loo baahdo, ilmaha waxaa rugta caafimaadka carruurta u qori karaa gudbin xirfadle kale ama daryeel caafimaad oo takhasus ah.





**Euroopan unionin
osarahoitama**

Mashruuca Niitty 2 – 2023–2026

Wadajir u taageeridda nolol
maalmeedka wanaagsan ee qoysaska
muhaajiriinta

Macluumaad dheeraad ah oo ku
saabsan mashruuca:

<https://projects.tuni.fi/niitty2/>

Bogga agabka macluumaadka ee
qoysaska:
tuni.fi/perheinfo

Lifaaqyada iyo macluumaad dheeraad ah:

Hay'adda Caafimaadka iyo Daryeelka Wanaagga (THL). Rugta
caafimaadka carruurta. <https://thl.fi/aiheet/lapset-nuoret-ja-perheet/sote-palvelut/aitiys-ja-lastenneuvola/lastenneuvola>

Hay'adda Caafimaadka iyo Daryeelka Wanaagga. Keydka xogta NEUKO.
<https://thl.fi/aiheet/lapset-nuoret-ja-perheet/sote-palvelut/aitiys-ja-lastenneuvola/neuko-tietokanta>

Sawirro:

Niitty 2 –mashruuc. Adobe Stock, Education License.



**Pirkanmaan
hyvinvointialue**



TAMPERE